



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
WADAJIR DISTRICT COURT
MOGADISHU-SOMALIA

Summad: MDW 617/2020

TR. 15/12/2020

UJEEDO:- SUGITAAN DHAXALKOOB, CADEYN TARIKO, IYO WAKAALAD.

Maanta oo ay taariikhdu tahay 15/12/2020, Waxaa maxkamadda Degmada Wadajir Hor Yimid Markhaatiyaasha kala ah:-

1-) Cumar Macalin Muuse Tifow, Somali ah, Ku Dhashay Muqdisho, Sanadkii 1952, Ina Xaliimo Cadaawe Cumar, oo sita P/tante ID.No.12710/Wasaarada Gaadiidka ee D.F.Somaliya

2-) Xuseen Maxamuud Xasan "Baar-Cadde", Somali ah, Ku Dhashay G/kacyo, Sanadkii 1952, Ina Xaawo Axmed Cawaale, Lana Masawiray.

Waxayna si Wadajir ah Maxkamadda Horteeda uga caddeeyeen in uu geeriyooday Marxuum la oran jiray MARXUUMAD KHADIJO CALASOW JIMCAALE, kuna geeriyootay Muqdisho, 2008, Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in Marxuumada labadeedii waalid iyo Saygeediina Ay ka geeri horeyeen, Waxayna ifka uga tagtay oo dhaxlaya 1, Wiil, iyo 4, Gabdhood, waxayna kala yihiin sidan soo socota:-

DADKA:-

1-Xaliimo	Baarre	Calasow	Marxuumad		(Gabadhii Marxuumada)
2-Xaawo	Baarre	Calasow	Degan Muqdisho	Dhalatay 1942	(Gabadhii Marxuumada)
3-Aamino	Baarre	Calasow	Degan Muqdisho	Dhalatay 1943	(Gabadhii Marxuumada)
4-Xasan	Baarre	Calasow	Degan Muqdisho	Dhashay 1947	(Wiilkii Marxuumada)
5-Cabdiyo	Baarre	Calasow	Marxuumad		(Gabadhii Marxuumada)

Intaas Kadib Waxaa Geeriyootay Marxuumad Xaliimo Baarre Calasow, Kuna Geeriyootay Ceel-dheer Sanadka 2009, Labadeedii Waalidna iyo Saygeediina Way Ka Geeri Horeyeen Waxayna Ifka uga Tagtay oo Dhaxlaya Dhaxaltooyo Ka Kooban 1-Wiil Wuxuuna Magaciisa yahay:-

1-Daa'uud Cali Qaboobe Degan Muqdisho Dhashay 1945 (Wiilkii Marxuumada)

Intaas Kadib Waxaa Geeriyootay Marxuumad Cabdiyo Baarre Calasow, Kuna Geeriyootay Muqdisho 2018 Bishii December, Labadeedii Waalidna iyo Saygeediina Way Ka Geeri Horeyeen Waxayna Ifka uga Tagtay oo Dhaxlaya Dhaxaltooyo Ka Kooban 3, Wiil, iyo 2, Gabdhood, waxayna kala yihiin sidan soo socota:-

1-Ismaaciil	Max'ud	Afrax	Degan Muqdisho	Dhashay 1972	(Wiilkii Marxuumada)
2-Farxiyo	Max'ud	Afrax	Degan Muqdisho	Dhashay 1977	(Gabadhii Marxuumka)
3-Sahro	Max'ud	Afrax	Degan Muqdisho	Dhashay 1987	(Gabadhii Marxuumka)
4-Xasan	Max'ud	Afrax	Degan Muqdisho	Dhashay 1990	(Wiilkii Marxuumada)
5-Xuseen	Max'ud	Afrax	Degan Muqdisho	Dhashay 1994	(Wiilkii Marxuumada)

Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in aysan jirin cid kale oo Marxuumada dhaxleysa haday noqon laheyd Asal Ama Farac.

EEG BOGGA LABAAD



MASAWIRADA DHAXALTOOYADA IYO MARKHAATIYAASHA

Cumar Macalin Muuse Tifoow



Xuseen Maxamuud Xasan




Aamino Baarre Calasow



Xasan Baarre Calasow



Ismaaciil Maxamuud Afrax




Farxiyo Maxamuud Afrax




Sahro Maxamuud Afrax



Xasan Maxamuud Afrax



Xuseen Maxamuud Afrax



BOGGA LABAAD

HANTIDA LAGA DHAXLAAYO MARXMUUMADA.

Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in **MARXUUMAD KHADIJO CALASOW JIMCAALE** ay ifka uga tagtay Guri Dhisan oo Jiingad ah, oo ku yaal xamar Degmada **Wardhiigleey "Janaral-Daa'ud,** Cabbirka **20X20** mitir, lotto L.r. **116-**, W.L.DH.BB/105/10/2017, Tr. 16.11.2017, iyo Rasiid No. 5210/2017, Tr. 16.11.2017, kana soo Wada baxay D/Hoose ee Muqdisho "Ahna Diplicate", Soodimihiisuna Kala yihiin **Bari iyo Waqooyi** Waxaa Ka Mara Jidad inta Kalana Waxaa Ka Xiga Dhul dad.

WAKAALADO GAAR AH:

Waxay Maxkamadda Degmada Wadajir Sugaysaa In Xaawo Barre Calasoow iyo Daa'uud Cali Qaboobe ay Soo Wakiisheen **Xasan Baarre Calasoow**, oo Dhaxaltooyada Ka Mid ah Sida Ku Cad **1-Wakaalad Gaar ah Sum:-008110/2020 Tr.22/12/2020**, Kana Soo Baxday Nootaayo Banaadir uuna Saxiixay Dr, Cabdi Cadaawe Cali, Sidoo Kale Dhaxaltooyada Kala ah 1-Aamino Baarre Calasoow, 2-Xasan Baarre Calasoow, 3-Ismaaciil Maxamuud Afrax, 4-Farxiyo Maxamuud Afrax,5-Sahro Maxamuud Afrax, 6-Xasan Maxamuud Afrax, 7-Xuseen Maxamuud Afrax, Waxay Maxkamada Horteeda Ku Wakiisheen **Xasan Baarre Calasoow**, una soo wakiisheen dhamaantood in uu u maamuli karo, dhaxalkoob u samayn karo, xafidi karo, gadi karo, Hibeyn karo, Wareejin karo, Qofkasta Qismigiisa Ku Wareejin karo, dhisi karo, dayactiri karo, kireyn karo, ka saari karo, saxiixi karo kaalintooda, una doodi karo una dacwoon karo oo qareen u qaban karo, Maxkamadaha dalka hortooda u matali karo qof waliba qismiga uu ku leeyahay dhamaan hantida dhaxalka ah oo ay ka dhaxleen **MARXUUMAD KHADIJO CALASOW JIMCAALE.**

=SAXIIXA MARKHAATIYAASHA=

1-)Cumar Macalin Muuse Tifow

2-)Xuseen Maxamuud Xasan "Baar-Cadde"

=SAXIIXYADA DHAXALTOOYADDA JOOGTA MUQDISHO=

1-Aamino Baarre Calasow, 2 -Ismaaciil M/ud Afrax,3-Farxiyo M/ud Afrax, 4-Sahro M/ud Afrax

5-Xasan Maxamuud Afrax, 6-Xuseen Maxamuud Afrax

=SAXIIXA WAKIILKA GUUD EE DHAXALTOOYADDA KANA MID AH DHAXALTOOYADA=

Xasan Baarre Calasoow

EEG BOGGA SADAXAAD

BOGGA SADAXAAD

SUGITAANKA MAXKAMADDA.

Maxkamadda markay aragtay codsiga Wakiilka dhaxaltooyadda, Markay dhageysatay marag furka markhaatiyaasha, Markay aragtay dukumintiyada guriga ee uu marxuumada ku qoran tahay, Markay aragtay Wakaalada gaarka ah, ee sare ku xusan, Waxay Maxkamada Degmadda Wadajir sugaysaa geerida **MARXUUMIINTA KALA AH 1-MARXUUMAD KHADIJO CALASOW JIMCAALE, 2-MARXUUMAD XALIIMO BAARRE CALASOOW, 3-MARXUUMAD CABDIYO BAARRE CALASOOW,** oo ay dhaxalkooda leeyihiin dadka sare ku xusan oo kaliya, waxay kaloo Maxkamaddu sugaysaa in **Xasan Baarre Calasoow,** uu Wakiil buuxa u yahay dhamaan dhaxaltooydda, isla markaana uu awood buuxda u leeyahay ku tasarufka guriga ay ka dhaxleen **MARXUUMAD KHADIJO CALASOW JIMCAALE,** ee sare ku xusan, Waana Sugitaan dhaxalkoob, wakaalad gaar ah, oo ansax ah waafaqsan Sharciga Islaamka iyo qaanuunka dalka, Waxaana lagu qoray diiwaanka guud ee mucaamilaadka.

KAALIYAHA MAXKAMADDA.

C/risaaq Cali Cabdi "Caabi"



GARSOORAHA MAXKAMADDA.

Sh.Maxamuud Salaad Cali.

